UW Medicine

ADEEGYADA DHAQAALAHA BUKAANKA
XEERARKA WAAXEED IYO HANNAANYADA HAWLGALEED

Magaca Xeerka/Hannaanka **Xeerka Biilka iyo Ururinta HMC iyo UWMC**

UJEEDDO:

Iskaashiga shaqada University of Washington Medical Center (UWMC) iyo Harborview Medical Center (HMC) waa inay horumariyaan caafimaadka dadwaynaha iyaga oo faafinaya aqoonta caafimaadka, iyaga oo siinaya daryeelka koowaad iyo ka takhasuska oo heersare ah dadkan gobolka, sidoo kalena soo saaraya dhakhaatiirta, saynisyahanada iyo xirfadlayaasha kale ee caafimaadka ee mustaqbalka. Si shaqadaasi u suurtogasho isbitaalku waxa uu u baahan yahay in uu dhaqangaliyo xeer ururinta daynta kaasi oo:

A. Lagu dhiirigalinayo in kharashka adeegyada la qabtay wakhtigiisa lagu bixiyo.
B. Ka jawaabaysa xaaladda dhaqaale ee bukaan kasta.
C. Bixisa ikhtiyaaro damacsan oo hufan oo ka jawaabaya bukaanada waajibaadkooda dhaqaale.

XEERKA:

Kharashka Lagu Dallacayo Caymiska:
Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ee UWMC iyo HMC waxa ay kharashka ku dallici doonaan gobolka, fadaraalka iyo shirkadaha ganacsiga ee caymiska. Bukaanka uma qabsanayno wax kharash ah ilaa aanu caymiska kala baxno, taas oo ay kamid tahay diidmada rafcaanada laga qaatay. Markasta oo ay macquulka tahay, waxaanu noqonayaa mid u doodaa xaqa bukaanka si aanu ugu soo dhicino kharashka caymiska kahor inta aananu u beddelin lacagta mid qofku iska bixinayo.

- Xisaabaadka qofku iska bixinayo lacagta waa in lagu bixiyo 30 maalmood laga bilaabo marka ay soo gaadhay bayaanka ugu horreeyey haddii aan heshiis kale la galin.
- Baaqiga uu qofku bixinayo ee inta caymiska kasoo hadha waxaa lagu bixin doonaa 30 maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta warbixinta la helay.
- UWMC iyo HMC waxay diraan bayaanada 30-kii maalmoodba mar ilaa 120-ka maalmood ee wareegga daynta bixinta laga gaadhayo.
- Muddadaas, bukaanadu waxa uu fursad u haystaan inay bixiyaan kharashka oo dhammaystiran ama gaadhaan heshiis dhaqaale oo ay kujiraan:
    - Qorshe kharash bixin
    - Kaalmo Dhaqaale (samofal)
    - Muranka kharashkaadka
    - Bixinta xog dheeraad ah ku dallicidda biilashada bixiye kale ama caymis

- Arrimaha tayada daryeelka iyo saxsanaanta qaansheegaha waa in sida ugu dhakhsaha badan loo saxaa kahor intaan la guda galin qaadidda daymaha.
- Wicitaanada macaamiisha ayaa la bilaa si loo helo lacagta ama loo gaadho heshiis dhaqaale.
- Bayaanka afraad waa “Wargelinta ugu Dambaysa” oo la socodsiinaysa dammiinka in xisaabtoodii lagu wareejinayo hay’ad ururisa daynta oo bannaanka ah haddii ayna bixin lacagta ama ayna heshiis bixineed ku galin muddo 30 maalmood ah.
- Haddii aan laga soo jawaabin ama aan lacagta oo dhammaystiran la bixin w a x a y keeni kartaa in lagu wareejiyo hay’adda ururisa daynta.
- Dhammaan bukaanada sheegta dhaqaale xumo waxaa dib u eegid lagu samayn doonaa inay heli karaan Kaalmo Dhaqaale iyo/ama Medicaid. Waxaa la bixin karaa Kaalmada Dhaqaalaha wakhti kasta, xataa marka la diro hay’dda daynta ururisa balse waa in la codsada intaan xukun maxkamadeed dhicin.

Ikhtiyaarada Diyaarka u ah Lacagta Bukaanka Iska Bixiyo:
UWMC iyo HMC way qaataan lacagta cad, jeeg ama kiridhit kaadh. Ku bixinta kiridhit kaadh waa la oggol yahay wixii taleefanka ah ama bixinta biilka onlaynka ah. Qaybaha bukaanka waxaa la bixinayaa marka ugu horreysa ee biilka kadib ka bixidda isbitaalka la helo haddii ayna jirin heshiis la isla gaadhay ama arji Kaalmo Dhaqaale oo la gudbiyay.

Qorshe Bixinta:
Heshiisyada bixinta kharashka waxaa lagu sameeyay codsi bukaanka ka yimi ee Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ah. Tani waxay dhigaysaa in bukaanku uu 12 bilood uu ku bixin karo xaddi lacageed oo isku mid ah, ama 24 bilood haddii loo ansixiyo inay duruufo jiraan.

Badh Ka Dhaafida Kharashka ee Qofku Lacagta Iska Bixinayo ee Dhabta Ah (caymis ku jirin):
Waxa jira laba nooc oo qiime-dhimis ah bixinta shaqsiga ee dhabta ah (aan caymis lahayn) oo la siiyo xarunta ku dalacaysa adeegyada caafimaad ahaan lagamamaarmaanka ah. Qiime-dhimista waxa laga dalbaday Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka (Patient Financial Services) oo waxa lagu muujiyay wax ka beddelada ku saabsan bayaanka bukaanka. Qiime-dhimista waxa la dalbadaa marka bukaanku aanu lahayn caymis oo aanu u qalmin Caawimada Maaliyadeed.

- UWMC iyo HMC waxay leeyihiin 30% qiime dhimis ah marka bukaanada aan lahayn caymiska lagu arko waada gargaarka degdega ah.
- UWMC waxay leedahay 10% qiime-dhimis ah marka bukaan aan lahayn caymis lagu arko meel ka baxsan qolka waxaada xaaladda degdega ah qofku iska bixinayo.

Dammaanadda Daawaynta:
Marka uu bukaanku galay shil ama cid ku tacadiday, shirkaddooda caymisku
guud ahaan ma bixiso kharashka adeeggooda caafimaad marka la ogaado inay cid kale ka masuul tahay. Sidoo kale, bukaanku haddii aanu lahayn caymis balse uu doonayo inay ka bixiso cidda ka bixinaysa kharashka. Markay xaaladdu sidan tahay UW Medicine waxay gudbin kartaa dammaanad ka dhan ah wixii lacag laga bixinayo dhaawaca shakhsi ahaaneed ee mustaqbalka. Foomka dammaanaddu waa mid lagu sugayo danaha dhabta ah ama hantida qofka si amaahda loo bixiyo.

Xisaabaadka Loo Wareejiyay Si Loo soo Ururiyo:
Shaqada waxaa kamid ah:

- Wargelinta hore ee lagu wargelinyo dammiinka in uu kaga soo jawaabo 30 maalmood kahor intaan laga warbixin daynta: daynta waxaa laga warbixiyaa maalinta 45aad.
- Soo Hadlidda.
- Go'aano sharci ah oo sheegaya la wareegista mushaharka.
- Dammaanadda Daawaynta.

Xog dheeraad ah oo ku saabsan xisaabta ururinta:

- PFS waa inay ansixisaa wixii tallaabo sharci ah ee laga qaadayo xisaab.
    - PFS oggolaan mayso dacwayn haddii ayna jirin shaqo uu qofku ka shaqeeyaa.
    - Dacwada ay xaraynayso UWMC iyo HMC waxaa qaban doona Kaaliye Xeer-Ilaaliye oo “Gaar ah” oo la shaqeeya hay’dda.
- Xisaabaadka lagu meeleeyey mid kamid ah labada hay’adood ee qandaraaska ku qaatay muddo hal sano ah waxa lagu meeleeyaa hay’ad kale oo labaad, haddii aan la bixin lacagta ama xukun sharci ahi soo bixin.
- Cidda kale ee lagu wareejiyay waa la soo celinayaa sanad kale kadib haddii ayna wax dhaqdhaqaaq ah 90 cisho ee hore arag.
- Xisaabta cidda kale soo celisay waxaa loo aqoonsan doonaa in aan la helaynin waxaana laga saari doonaa Daynta ay inoogu maqan tahay Hay'adda Ururinta Dayntu.
- Daynta baaqiga ah waxa ay ku jiri doontaa xisaabaadka dammaanad-qaadaha toddoba sano ama toban sano haddii xukun sharci ah u soo baxo.

Tallaabooyinka Ururinta Kharashka ee Aan Caadiga Ahayn (ECA):

Xisaabta Bukaanka waa in aanay galinin wax ECAs ah[1], UWMC, HMC ama hay'adda ururinta kharashka loo diray, ilaa ay yimaadaan xaaladaha soo socdaa:

1. Waxaa la sameeyay dadaal macquul ah oo lagu ogaanayo u-qalmidda Kaalmada Dhaqaale.

   Waxaa kamid ah dadaalada macquulka ah kuwa soo socda[2];

   a. Bukaanka waxaa la siiyaa guudmar luuqad cad ku qoran oo Xeerka Kaalmada Dhaqaale iyo arji kahor intaanu ka bixin isbitaalka waxaana laga caawiyaa in uu arjiga buuxiyo;
   b. Haddii ay na soo gaadho arji aan dhammaystirnayn, oo loo diro qoraal wargelin ah oo xogta/dokumentiyada maqan ah bukaanka oo ay ku jirto wargelinta wixii Isbitaalka ECA ee (ama hay'adda Isbitaalka) inay bilaabi karaan ama halkii ayaa laga sii wadi karaa haddii arjiga ama lacagtii aan la helin muddadaa gaarka h ee la qabtay;[3]
   c. Dhammaan bayaanada biilasha waxa la socda wargelinta cad oo la xidhiidha helitaanka Kaalmada Dhaqaale taas oo leh taleefan la waco si lo helo xogta/kaalmada iyo cinwaanka websaytka kaas oo nuqullada dokumentiyada Kaalmada Dhaqaalaha laga heli karo;
   d. Buuxinta arjiyada Kaalmada Dhaqaale wakhtiga ku munaasabka ah ayaa lagu mariyaa nidaamka arjiga bukaankana waxaa lagu wargeliyaa qoraal waxa la go'aamiyay, waxaa la siin doonaa bayaanka biilka ugu danbaysay haddii baaqi jiro, waana loo celiyaa lacagta haddii lagu bixiyay lacag wakhtiga la ansixiyey kaasi oo uu xoojiyey arjig.
   e. Isbitaalku waxa uu galiyay dadaalkii la rabay si uu u ogaado u-qalmidda bukaanka Kaalmada Dhaqaale ee u diyaarka ah isaga oo raacaya xogta u-qalmidda bukaanka ee hal sabab ama wax ka badan-barnaamijyada dadwaynaha ee la tijaabiyey.
   f. Isbitaalku waxa uu siin karaa Kaalmo Dhaqaale bukaanka ku hoobta inuu dhiibo xogta/dokumentiyada looga baahnaa oo dhammaystiran ee arjiga Kaalmada Dhaqaalaha.

2. 120 maalmood ayaa kasoo wareegay wakhtigii lasoo saaray qaansheegta kharashka ka bixidda isbitaalka; sidoo kale

3. Shuruudaha wargelinta ee soo socda waa la buuxiyay (ugu yaraan kahor 30 maalmood bilaabista ECA):
   a. Qoraal wargelin ah ayaa la diraa kaas oo lagu wargelinayo jiritaanka Kaalmada Dhaqaale;
   b. Bixint guudmarka luuqadda cad ku qoran ee Xeerka Kaalmada Dhaqaale ;
   c. Wargelinta tallaabada la qaadayo haddii aan la bixin kharashka;
   d. Wargelinta taariikhda wixii ka danbeeya tallaabada la qaadayo haddii aanay nasoo gaadhin kharashku; iyo
   e. Isku-dayo la sameeyey in afka loogaga waramo bukaanka Xeerka Kaalmada Dhaqaale iyo arjiga Kaalmada Dhaqaale.

4. Sheegista amaahda ayaa iman karta 150 maalmood kadib qaansheegta koowaad ee isbitaal ka bixidda kadib.

5. Baaqiga lagu dacwayn maayo qofka ilaa 240 maalmood kadib markii la soo saaray qaansheegta bixidda kadib.

6. Dadaal ku filan ayaa la geliyay si loo ogaado u-qalmidda bukaanka Kaalmada Dhaqaale. In si

[1] ECAs waxaa kamid ah ka dhigista dammaanad hantida gaarka ah, u sheegista qofka hay'ad dayn ururin, la wareegista mushaharka iyo dalabka kharashka ama deebaajiga kahor inta aan la siin daryeelka caafimaad ee daruuriga ah.

[2] Isbitaalku ma samaynaynin dadaal macquul ah si uu u ogaado u-qalmidda bukaanka kaliya marka uu bukaanka ka helo ka dhaafis saxeexan, sidoo kale Isbitaalka looma arkayo in uu dadaal macquulka ah sameeyay haddii Isbitaalku caddeeyo in aanu u-qalmin isaga oo ku salaynaya xog la aaminsan tahay inay been tahay ama aan saxsanayn ama bukaanka khasab ama cagajugleyn lagaga qaaday.

[3] Wixii ECAs la bilaabay waa la hakinayaa.

Siman Loola Dhaqmo Dhammaan Bukaanada/Damiinada:

UWMC iyo HMC waxay uga shaqeeyaan xisaabaadka bukaanka qaab waafaqsan xeerkan kharash qaadidda. Xaaladdii doontaaba ha jirtee looma eego hirgalinta xeerkan da', isir, midab, jinsi, doorashada jinsiga ama waddanka qofku uu ka soo jeedo.

Nuqul xeerkan ah, iyo sidoo kale nuqullo Xeerka Kaalmada Dhaqaale, Guudmarka Luuqadda Cad ku Qoran ee Kaalmada Dhaqaale iyo arjiga Kaalmada Dhaqaale waxaa lagu heli karaa iyada oo lala xidhiidhayo:

Harborview Medical Center (HMC)
Financial Counseling
325 9th Ave; Mail Stop 359758
Seattle, WA 98104-2499
206.744.3084
Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo – 4:30 galabnimo

UW Medical Center (UWMC) Financial Counseling
1959 NE Pacific Street, Mail Stop 356142
Seattle, WA 98195-6142
206.598.3806
Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo – 4:30 galabnimo

HMC & UWMC
Patient Financial Services
P.O. Box 95459
Seattle, WA 98145-2459
206.598.1950 ama 1.877.780.1121
FAX 206.598.2360
Isniin-Jimce 8:00 subaxnimo – 4:30 galabnimo
Websaytka: http://www.uwmedicine.org/financialassistance